## Lulmada cunugga

Haddii cunuggaaga laga kicin Karin hurdada inkasta oo xoog layskugu dayay markaa waxuu ku jiraa ' miyir- beel'. Cunugga ku jiro miyir-beelka waxuu si hoos u qoto dheer ayuu u xis-la'aan yahay, waxuuna u baahan yahay xanaanada daawaynta.

## Maxuu cunugga ugu jiraa miyir-beelka?

Waxay caruurta u miyir-beeli karaan sababo badan ee kala duwan. Waxay mar mar noqon kartaa wax aad u cad sababta (tusaale si xun oo madaxa looga garaaco), laakin mar mar waxay noqon kartaa wax aad u dhib badan in la ogaado sababta (tusaale, dhibaato dhif ah ee kiimikada jirka).

Waxaa ku jiraan sababaha:

- Dhaawac madaxa loo gaysto
- Qallal ama suuxtin
- Dareerka dhiigga oo bukado ('sepsis')
- Bukashada gudaha ama agagaarka maskaxda ('encephalitis' ama 'meningitis')
- Sonkorta dhiigga oo hoos u dhacdo ('hypoglycaemia')
- Kiimikada jirka oo qasanto ('cudurada tamar la'aanta)
- Shilka qaadashada saa'idka ah ee daawada

Waxay takhaatiirta iyo kal-kaaliyayaasha waydiin doonaan su'aalo badan ee ku saabsan cunuggaaga. Waxay kale oo ay ka qaadayaan tiro tijaabooyin ah cunuggaaga si ay iskugu dayaan inay ogaadaan sababta miyir-beelka. Waxay sidaan qaadan kartaa waqti.

## Sidee u caawini kartaa?

U sheeg takhaatiirta iyo kal-kaaliyayaasha si toos ah haddii aad u malaynaysid inay jirto wax sababay dhibaatada. Gaar ahaan:

- Ma aragtay cunuggaaga oo jaraynaayo?
- Miyuu cunuggaaga qabay xumad?
- Miyay jiraan kaniiniyo ama daawooyin guriga yaalay oo cunuggaaga qaadan karay?
- Miyuu cunuggaaga u qabaa casaasiyad wax daawo ah?
- Miyuu cunuggaaga qaatay aspirin?
- Miyuu cunuggaga la xiriiray qof qabo meningitis ama duray?
- Miyuu ku jiraa qooyskaaga qof lahaa dhallaan ama cunug aad u tabar-daran?
- Miyuu cunuggaaga dibedda u baxay?

## Waa maxaay tijaabooyinka laga qaadi doono?

Marka koowaad waxaa tijaabo ahaan looga qaadayaa dhiigga iyo xoogaa kaadi ah. Natiijooytinka ka soo baxa tijaabooyinkaan waxay ka caawinayaan takhaatiirta iyo kal-kaaliyayaasha inay ka gaaraan go'aan waxay ay sababta tahay iyo daawaynta la bilaabaayo. Waa in lagu diyaariyaa tijaabooyinkaan xoogaa saacado gudahood, laakin qaarkood waxay qaadanayaan dhoowr maalmo ah.

Haddii ay u muuqato in cunuggaaga ka buko gudaha ama agagaarka maskaxda ('encephalitis'ama'meningitis') markaa waxaa loo baahan karaa sawirka lagu yaqaan lumbar puncture ama LP. Waxaa tijaabadaan lagu sameeyaa iyada oo loo isticmaalaayo cirbad aad u dhuuban lagana gelinaayo dhabarka cunuggaaga si looga soo qaado xoogaa dhacaan ah agagaarka xaroorka iyo maskaxda. Waxaa markaa laga soo saarayaa cirbadda. Waxaa loo samaynayaa tijaabadaan keliya markii ay sugan tahay, bacdamaa uu cunuggaaga u baahan yahay in loo celiyo ilaa waqti si isku laab laab ah.

Waxay tijaabada kale noqon kartaa in loo baahdo skaanka maskaxda ama 'CT scan'. Waa X-ray (raajo) ee gaar u ah cunuggaaga madaxiisa, oo muujin karo meel kasto ee ka bararsan maskaxda. Waxuu cunuggaaga u baahan yahay inuu u seexdo mashiinka si aad u toos ah waxaana sidaas darted loo baahanaa in la suuxiyo ( in lagu seexiyo daawo).



Bukaan saran CT scan-ka maskaxda

Mar labaad waxaa la samaynayaa keliya sidaan haddii uu cunuggaaga qabo caafimaad fiican ee ku filan waqtigaas.

## Maxaa daawo ah oo la siinayaa?

Intii lagu jiro dhoowrka saacadood ee hore waxay takhaatiirta iyo kal-kaaliyayaasha hubinaayaan inuu cunuggaaga u neefsanaayo si fiican. Haddii uu jiro wax welwel ah ee ku saabsan sidaan markaa waxaa cunuggaaga loo gelinayaan qalabka lagu neefsado (dabeel-siiye) ilaa isaga ama iyada ay ka neesan karaan mar kale iyaga oo aan u baahan caawinaaddaan.
Haddii uu wadnaha cunuggaaga uusan ugu soo qaadayn dhiigga si ku filan jirka, markaa waxaa la siinayaa fleebo ('dhibic') iyo daawooyin si loo caawiyo.

Mar mar, waxaa kor u kici karo dhiigga ku jiro maskaxda sababta oo ah bararka. Gaar ahaan waxaa loo baahan karaa daawooyin si looga caawiyo inuu hoos u dhaco dhiigga iyo bararka.
Waxaa loo isticmaalayaa in lagu daaweeyo bukasho kasto oo ah bakteeriya ee

Dhiigga (sepsis') antibiyotiko xoog leh ama bukashada dareeridda agagaarka maskaxda (meningitis). Haddii uu jiro bukasho uu sababay virus ku dhacay maskaxda ('encephalitis') markaa waxaa loo isticmaalayaa daawo kale si looga daaweeyo

Waxaa loo baahan karaa daawooyin gaar ah oo ku xiran natiijooyinka ka soo baxo tijaabooyinka oo loo malaynaayo inay keeni karaan miyi-la'aanta.

## Maxaa xigo oo dhacayo?

Waxa xigo oo dhici doono waxuu ku xiran yahay waxa sababta ay tahay iyo sida uu u liito cunuggaaga. Waxay caruurta qaarkood u baahan yahiin in la geey unugga xanaanada degdegga ah, inta kuwa kale la gayn karo qaybta caruurta.

Takhtarka iyo kal-kaaliyayaasha cunuggaaga waxay mar kasto diyaar u yahiin inay kaaga la hadlaan welwelkaaga iyo inay kaaga jawaabaan su'aalahaada sida ugu fiican oo ay awoodaan.

## Wararka dheeriga ah


Waxay ku diyaarisay "Contact A Family" shabakadda internet-ka www.cafamily.org.uk faahfaahinada ku saabsan sababaha kala duwan ee miyir-la'aanta iyo kooxaha kaalmaynta deegaanka ee waaliddiinta iyo qooysaska .

Waxaa kharashka warqaddaan bixiyay

The National Reye's Syndrome Foundation UK
Xaaladda u keeni karto cunugga miyir-la'aanta
www.reyessyndrome.co.uk
Urur samafal ee ku diiwangashan Lam. 288064

# Cunuggayga ma ka kacaayo jiifka



Warqadda waaliddiinta ee cunugga ku jiro miyir-la'aanta